

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3612/092015

DATE: 26/09/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0517/092015

Cusboonaysiin

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 3aad, Faqradiisa 6aad ee Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axaabta Siyaasadda Xeer Lr. 14/2011;

Markuu Arkay: Wax-ka-beddelka iyo Kabista Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axaabta Siyaasadda Qodobkiisa 3aad, Faqradda 6aad oo jideynaysa in muddada Guddida Diiwaangelinta iyo Ansixinta Axaabtu tahay 2 sanno oo ka bilaabanta maalinta la dhaariyo;

Markuu Ogaaday: In xilligii dhaartu ay ahayd 04/10/2011-kii kuna ekayd 04/10/2013;

Wuxuu go'aansaday:

In Guddida Diiwaangelinta Ururada iyo Ansixinta Axaabta u cusboonaysiiyo muddo xilleed dambe oo ah Laba sannadood oo ka bilaabanta 05/10/2015.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

(Xigasho: Faafinta Rasmiga ee JSL, Cadadka 10aad ee 07 Nofambar 2015)

Faalo: Sida uu dhigayo Qod. 3(6) ee Xeerka Xisbiyada (Lr. 14/2011), Gudidan muddo xilleedkeedu wuxuu yahay 2 sanno oo laga bilaabo maalinta xilka loo dhaariyey oo ahayd 4tii Oktoobar 2011, waxaana “***cusboonaysiin karaa hadii loo baahdo, iyada oo muddo kordhintaasi cusub laga ansixin doono Golaha Wakiilada***”. In kastoo aanay Dikriitadan ku qorneyn, waxaa la sheegay in M/weynuhu u kordhiyay muddo xilleedkooda, bishii Oktoobar 2013 (4teedii?), laba (2) sanadood, mana cadda in ay ansixiyeen Golaha Wakiiladu. Dikriitandan haddana waxay Gudida u kordhisay muddo xilleedkooda laba (2) sanadood oo kale oo ay markaas ku ekkaanaya 5ta Oktoobar 2017, haddii ay ansixiyaan Golaha Wakiiladu.